# GOLAHA WAKIILADA JSL

## WAAXDA HADAL-QORAALKA IYO GUDIYADA

**Kal-fadhigii 37aad fadhigii 10aad**

**24/07/2018**

**Quraanka: -** Md Maxamuud Axmed Obsiiyey

**Gudoonka: -** Gudoomiye Md. Baashe Maxamed Faarax

**Ajandaha Fadhiga:-**

- Ansixinya xeerka ka soo noqday Golaha Guurtida ee Xeerka Shirkaddaha Somaliland.

**Gudoomiyaha: -** Waxaynu mudanayaal u balan sanayn ansixinta Xeerka Shirkadda Somaliland, xoghaynta ha akhrido qodob qodob, Waxaana fadhiya 42 xuldhibaan markaa qodobka ugu horeeya ee ay wax ka bedelka Golaha Guurtidu ku samaysay xeerka xoghayntu ha akhrido:-

**Qodobka 2aad: Magac Xeerka**

Xeerkan waxa loo yidhayaa Xeerka Shirkadaha, Xeer Lr.78/2017

**Waxay u beddeleen sidan:** Xeerkan waxa loo yidhayaa Xeerka Shirkadaha, Xeer Lr.80/2017.

Xeerka lambarka ma siiyaan Golaha Guurtidu oo xeerka Kuftisa ayaa leh Xeer Lr.80/2018.
Markaa xeerkan waxa loo daynayaa Xeerka Shirkadaha, Xeer Lr.78/2017.

**Qodobka 11aad: Aasaasida Shirkadaha**

**Qodobkan wuxuu u dhignaa sidan:** Hal qof iyo in ka badan ayaa aasaasi karra shirkad waxayna qoraalka aasaasidda (Statement of formation) Diiwaa-hayaha si waafaqsan cutubka 12aad ee xeerkan. Qofka dabiiciga ah ee aasaasaya shirkad waa inuu noqdaa ugu yaraan 18jir miyir qaba, daruuri maaha in qofkaasi ama dadkaasi ay saamile ka noqdaan shirkadda ka dib marka la aasaaso.

**Waxay u beddeleen sidan:** Hal qof iyo in ka badan ayaa aasaasi karra shirkad iyaga oo u keenay qoraalka aasaasidda (article of association) u keenayaan xeer-ilaaliyaha Guud.

Qofka aasaasaya shirkad waa inuuna ka yaraan 30jir caqli qaba, khibradna u leh shaqada, qofka ama dadka aasaasaya shirkad daruuru maaha inuu saamile ka noqdaan shirkadda ka dib marka la aasaaso.

**Guddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol in sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyey loo raaco gacanta ha taagaan:

Xildhibaanada fadhiya: 42

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 35

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 2

Xidhibaanada Aaamusay: 4

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 11[aad] waxa lagu ansxiyey sidii Golaha Wakiiladu hore ugu ansixiyey.

**Qodobka 12[aad]: Qoraalka aasaasidda (Statement of formation)**

**Qodobkan wuxuu u dhigaan sidan:-**

1) Qoraalka aasaasidu waa in ay ka muuqataa:-

   a) Magaca shirkadda oo waafaqsan cutubka 3aad ee xeerkan.
   b) Cinwaanka xafiiska Guud ee shirkadu yeelato bilawga.
   c) Magac saxda ah iyo cinwaanka waraaqaha loogu diri karo ee dadka aasaasaya shirkadda.
   d) In uu maamulka shirkadu uu gacanta ugu jiro mid ama in ka badan oo maareeyayaal ama inuu gacanta ugu jiro saamiley, mid oo ay tahay.
   e) In ugu yaraan shirkadu leedahay hal saamile.
   f) Wax kasta oo kale oo dadka aasaasaya shirkadu go'aansadaan inay ku daraan qoraalka aasaasidda.

Waxay sidan ku beddeleen farqadaha d,e, iyo f, waxana lagu ururiyey d. iyaga oo u dhigay sidan:

d) Nooca shirkadda iyo qaab dhismeedkooda

f) Ruqsadda Wasaarraddu siiso (Firqaddan waa lagu kordhiyey).

**Guddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol in sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyey loo raaco gacanta ha taagaan:

Xildhibaanada fadhiya: 42

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 35

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 0

Xidhibaanada Aaamusay: 6

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 12[aad] waxa lagu ansxiyey sidii Golaha Wakiiladu hore ugu ansixiyey.

**Qodobka 14[aad]: Jiritaanka Shirkad**

Xaqiiqda ah in qoraalka aasaasiddu uu ku jiro diiwaanka Diiwaan-hayaha waxay marag ka tahay in shirkadu tahay shirkad iyo dhammaan xaqaa'iqa kale ee looga baahan yahay in lagu darro qoraalka aasaasidda ku cad qaodobka 12aad ee xeerkan.

**Waxay u beddeleen sidan:-** Xaqiiqda ah in qoraalka aasaasiddu uu ku jiro diiwaanka xeer-ilaaliyaha (Diiwaan-hayaha) waxay marag ka tahay in shirkadda tahay shirkad jirta.

**Guddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol in sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyey loo raaco gacanta ha taagaan:

Xildhibaanada fadhiya: 42

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 33

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 1

Xidhibaanada Aaamusay: 7

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 14aad waxa loo raacayaa sidii hore ee Golaha Wakiiladu ku ansixiyey.

**Qodobka 18[aad]: Magac shirkadeed shirkad tahli-waag ah**

**Qodobka oo u dhigan sidan:-** Magac shirkada tahli-waaga ah waa in lagu daraa ereyga tahli-waa (delinquent) oo ay raacayso bisha, maalinta iyo sanadka shirkadu noqday tahli-waa ka dib maalinta afar boqolaad ka dib taariikhda dhaqangalka tahli-waaga si waafaqsan qodobka 74aad ee xeerkan.

**Waxay u beddeleen sidan:-** Magac shirkada kacday waa in lagu daraa ereyga kacday (insolvent) oo ay raacayso bisha, maalinta iyo sanadka shirkadu ay kacday, sida ku cad qodobka 74aad ee xeerkan.

**Guddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol in sida Golaha Guurtidu u beddeleen la raaco gacanta ha taagaan:

Xildhibaanada fadhiya: 42

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 32

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 1

Xidhibaanada Aaamusay: 8

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 18aad waxa loo raacayaa sida Golaha Guurtidu u dhigeen.

**Qodobka 35aad: Magacaabis Maareeyaha**

**Qodobku wuxuu u dhignaa sidan:** Saamilayda shirkadda ayaa, haddii qoraalka aasaasku ama qoraal diiwaan-gelinta shirkada jirta uu dhigayo in maamul shirkadda. Maareeyaha ama in ka badan, u xilsaaraya hal maareeye ama in ka badani maamulka shirkadda. Maareeyaha qof dabiici ahi waa in uu noqdaa ugu yaraa 18 jir. Maareeyayaasha wax axil loogu dhiibi karaa loogana qaadi karaa go'aan aqlabiyad ah oo ay gaadhaan saamilaydu.

**Waxay u beddeleen sidan:-** Saamilayda shirkadda ayaa haddii qoraalka aasaasku ama qoraalku diiwaan-gelinta shirkad jirta uu dhigayo in maamulka shirkadda uu magacaabayo hal maareeye ama in ka badan, da'da maareeyuhu waa inuu ugu yaraan 30jir yahay caafimaad qabaa khibradna u leh shaqada.

**Guddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol in sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyey loo raaco qodobkan 35aad gacanta ha taagaan:

Xildhibaanada fadhiya: 42

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 23

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 10

Xidhibaanada Aaamusay: 8

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 35aad waxa loo raacayaa sidii hore ee Golaha Wakiiladu ku ansixiyey.

**Qodobka 36aad: Awoodda Maamulka Shirkadda**

**Golaha Guurtidu waxay ka saareen farqada 2aad ee Qodobkan 36aad oo u dhigaan sidan:-**

**2)** Ogolaansho saamile walba waa shardi marka.

**Guddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol in sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyey oo loo raaco qodobkan 36aad gacanta ha taagaan:

Xildhibaanada fadhiya: 42

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 33

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 0

Xidhibaanada Aaamusay: 8

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 36aad waxa loo raacayaa sidii hore ee Golaha Wakiiladu ku ansixiyey.

**Qodobka 37aad: Saraakiisha iyo Wakiiladda**

**Qodobku wuxuu u dhignaa sidan:**

1) Shirkaddu waxay yeelan kartaa ha lama in ka badan oo sarkaal ama wakiilo ah oo leh shqada, xuquuqda, waajibaadka iyo awoodda (Authority) ay siiso shirkaddu. Sarkaalka ama wakiilka ah qof dabiici ah waa noqdaa ugu yaraan 18 jir. Marka laga reebo sida ku dhigan farqadda (2) ee qodobkan, saraakiisha iyo wakiilad kale waxa xilka loogu dhibi karaa, laga qaadi karaa, shaqadooda, xuquuqdooda, waajibaadkooda iyo awoodoodana lagu dejin kara oglaansho ay bixiyaan aqlabiyadda maareeyayaasha.

2) Saraakiisha iyo wakiiladda kale waxa keliya oo u siin kara wood inay qabtaan shaqo ka baxsan hawsha caadiga ah ee ganacsiga shirkadda dhammaan saamilayda shirkadda oo wadda ogolaadaa.

**Waxa loo beddelay farqada koowaad sidan:-**

1) Shirkaddu waxay yeelan kartaa hal ama in ka badan oo saraakiil ama wakiilo ah oo leh shaqada, xuquuqda, waajibaadka iyo awoodda (Authority) ay siiso shirkaddu. Sarkaalka ama wakiilka ah qof dabiici ah waa inuu noqdaa ugu yaraan 30jir, khibrad u leh shaqada loo igmaday.

**Guddoomiyaha:** Xildhibaanada ogol in sidii Golaha Wakiiladu ku ansixiyey oo loo raaco qodobkan 36aad gacanta ha taagaan:

Xildhibaanada fadhiya: 42

Xildhibaanada ogol sidii Golaha Wakiiladu u ansixiyey: 26

Xildhibaanada Ogol sidii Golaha Guurtidu u dhigeen: 6

Xidhibaanada Aaamusay: 9

Guddoomiyuhu: Ma Codayn

**Guddoomiyaha:** Qodobadda 37aad waxa loo raacayaa sidii hore ee Golaha Wakiiladu ku ansixiyey.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI** |
| **---------------------------------** | **-----------------------------------** |